Waa wanaagsan tahay in wax laga ogaado

Kaalmada dhaqaale

NORRKÖPING

Deyrta 2020 waxaan hagaajinay adeega e-lektarooniga ah waana la fududeyey si aad ugu soo codsato kaalmada dhaqaale habka dhijitalka ah.

Tusmada

Waa maxay kaalmada dhaqaale?..... 4

Maxaa la iga caawini karaa?

Yaa heli kara kaalmada dhaqaale?

Sidee baan u soo codsaa?.....5, 6

Ku soo codso habka adeegga e-lektarooniga ah
Ku soo codso habka foomka/warqad
Maxaan ugu soo codsan habka adeega e-lektarooniga?

Habkee loo maraa? 7

Su´aalo dheeraad ah 8,9

Warbixino dheeraad ahiyo caawimaad.....10

Waa maxay kaalmada dhaqaale?

Kaalmada dhaqaale waxaa loogu talagalay qofka ku sugan dhaqaale xumo waqti gaaban. Haddaba si aad u hesho kaalmadaas dhaqaale, waa inaad samaysay si walba oo aad masruuf kula soo bixi karto. Hadafka dheer oo laga leeyahay kaalmada dhaqaale waa inaad isku filnaansho gaarto

Maxaa la iga caawini karaa?

Kaalmadaan waxaa loogu talagalay kharashka bisha sida cuntada, dharka, telefoonka iyo kirada. Waxaa kaloo dhaqaale ahaan lagaa kaalmeyn karaa waxyaalaha aad ugu baahan tahay nolol-maalmeedka, sida muraayadaha aragga, daryeelka ilkaha iyo xannaanada carruurta.

Yaa heli kara kaalmada dhaqaale?

Mar walba oo aad soo gudbiso codsi kaalmo dhaqaale, waxaa lagu qiyaasayaa hadba sida xaaladdaadu tahay, laakiin si aad xaq ugu yeelato kaalmo dhaqaale waxaa shuruud u ah in:

- Aad ka qoran tahay Xafiiska shaqada oo aad shaqo u raadineyso.
- Aadan wax lacag ah ku haysan bangiga ama aadan haysan wax qiimo leh oo la iibin karo. Tusaale baabuur, doon, dahab ama qalin ama naqshado qaali ah.
- Maheli kartid gunno kale, sida tan khasnadda shaqala'aanta, barnaamijka meeleynta, bukaanka ama waalidnimada. Laakiin waxaad xaq u yeelan kartaa kaalmo dhaqaale intaaad sugeysogo'aan lagagaaro kaalmo kale oo dhaqaale. Mararka qaarkood waxaa waajib kugu noqon kara inaad dib u soo celiso kaalmo dhaqaale oo lagu siiyey, waa haddii la go'aamiyo kaalmo kale oo laguu gartay xilligii aad tii hore qaadatay.
- Ama uusan ku masruufi karin qofka aad isqabtaan ama guur oo kale isula nooshihiin

Sidee baan u soo codsadaa?

Ku soo codso habka adeegga e-lektarooniga

1. Gal bogayaga barta internetka Norrkoping.se ka raadi kaalmo dhaqaaleedka
2. Guji/taabo ´´ Bilow adeega e-legktarooniga´´
3. Waxaad ku galeysaa kuna sexiixeysaa aqoonsiga e-lektarooniga ah tusaale Mobilt bank-ID. Hadii aad labo qofood ku soo dalbaneysaan waa inn aad labadiinaba ku sexeexdaan aqoonsiga e-lektarooniga ah. Hadii aadan laheyn Mobilt bank-ID waxaad laxiriireysaa bangigaaada.

Maxaan ugu soo codsan habka adeegga e-lektarooniga?

Maxaayeelay Wey fududahay in aad kaalmo dhaqaaleedka ku soo codsataa habka adeegga e-lektarooniga ah waxaad:

- ka arki kartaa goorta laguu go´aamiyo lacag bixinta
- Waxaad ka aqrisankartaa go´aankaaga iyo habkii lagusaleeyey go´aanka.
- Kala socon kartaa arrintaada bilowga codsiga ilaa go´aan helidda.
- Ku soo lifaaq si toos ah dokumentiyada adeega e-lektroniga. Waxaad ku sawiri kartaa dokumentiyada kamarada mobiilkatelefonkaaga ama waxaad si toos dukumentiyada ugu soo lifaaqi kartaa adoo ka soo qaadaaya kombuyuterkaaga
- Soo dhiibo codsigaada goor walbo habeen iyo maalin.

Ku soo Codso habka foomka/Warqada

Hadii aadan codsigaada ku soo dhiiban karin habka e-lektarooniga ah waxaad ku soo codsan kartaa habka foomka/Warqadda.

Foomka waxaad ka heli kartaa xafiiska suuqa shaqada- iyo waxbarasha dadka waaweyn ama ka soo dagso barta internetka bogga degmada.

Xasuusnow

- Haddii aad u baahan tahay kaalmo dhaqaale waa in aad bil walbo soo gudbiso foom codsi oo cusub.
- Hadii aadan ku qanacsanayn go´aankaaheshay waxaad ka qaadan kartaa racfaan ama dacwad waana inaad dacwaddas soo gudbisaa muddo saddex toddobaad ah oo laga soo bilaabo maalintii aad go´aankaas heshay.

Habkee loo maraa?



Wixii dhammaystir loo baahdo

Haddii foomkaas aysan la socon wax lagaaga baahnaa, waxaa khasab nagu noqoneysa inaad soo dhammaystirto warbixinaha ama dokumeentiyada maqan.

Go´aan

Marka uu na soo gaaro codsigaagu ayaa qof hawlwadeen ahi baarayaa haddii aad xaq u leedahay kaalmo dhaqaale sida waafaqsan xeerka gargaarka bulshada, iyadoo laga eegayo baahidaada iyo fursadaha aad u leedahay inaad adigu is masruufto. Kadibna waxaa la gaarayaa go'aan guriga laguugu soo dirayo.

Halka lacagta lagu soo shubayo

Haddii lagu go'aamiyo in lacag lagu siiyo, waxaa lacagtaas lagu soo shubayaa koontadaada bangiga

Su’aalo dheeraad ah

Ma la diiwaangelinayaa macluumaadkayga?

Shaqaalaha ku hawllan arrimaha kaalmada dhaqaale waxaa waajib ku ah qarinta sirta. Waxaad xaq u leedahay inaad aragto waxa lagaa qoray oo aad sheegto haddii wax qalad yihiin.

Macluumaadkaaga (sida magaca iyo lambarka aqoonsiga) waxaa lagu kaydinayaa diiwaanka xafiiska waxbarashada iyo shaqa-u-carbinta dadka waaweyn. Waxaana macluumaadkaaga loo maareynayaa sida waafaqsan xeerka macluumaadka qofka (GDPR). Ka aqriso warbixino dheeraad ah habka loo xanaaneyno macluumadka qofka bogeena barta internetka, norrkoping/gdpr.

Ma dhici kartaa inay waajib igu noqoto inaan lacag dib u soo celiyo?

Haa, waajib ayey noqon kartaa inaad dib u soo celiso lacag horey laguu siiyey, haddii ay caddaato in lacag laguu soo hormariyey ama aad soo gudbisey warbixino qaldan.

Gacanhayahaaga ayaa kuu sheegaya haddii lagaaga baahan yahay inaad lacag dib u soo celiso.

Degmadee ayaan ka codsadaa kaalmo dhaqaale?

Waxaad kaalmo dhaqaale ka codsaneysaa degmada aad ka diiwaangeshan tahay ama dad aad isku xiran tihiin ku nool yihiin. Waxaad kaloo xaq uyeelan kartaa inaad kaalmo dhaqaale ka hesho degmada aad ku sugan tahay.

Kaalmo dhaqaale ma ka heli karaa Iswiidhen haddaan ku soganahay dalka kale?

Maya, waayo si aad u hesho kaalmo dhaqaale waa inaad ku sugan tahay Iswiidhen.

Talasiinta arrimaha deymanka iyo Miisaaniyadda/dhaqaalaha

Waxaa kaloo lagaa caawini karaa sidii aad dhaqaalahaaga wax uga beddeli lahayd iyo in talo lagaa siiyo sidii aad u bixin lahayd deymanka lagugu leeyahay. Warbixin dheeraad ah kala xiriir xafiiska waxbarashada iyo shaqa-u-carbinta dadka waaweyn

Ka qaybgalka shaqa-carbinta ama hawlo kale

Mar haddaad qaadato kaalmo dhaqaale waxaa lagaa dalbi karaa inaad gasho shaqo-carbin ama hawlo kale si aad sida ugu dhaqsaha badan isugu filnaato.

Warbixin dheeraad ah

Wixii su'aalo ah oo ku saabsan kaalmada dhaqaale waxaad kala xiriiri kartaa xafiiska waxbarashada iyo shaqa-u-carbinta dadka waaweyn.

Adareeska Booqashada

Tegelängsgatan 19 A, Saacaddaha xafiiska soodhaweynta fursan yahay ka akhriso barta internetka.

Adareeska boostada

Norrköpings kommun, arbetsmarknads- och vuxenutbildningskontoret,
601 81 Norrköping

Telefon

011-15 00 00 (kontaktcenter)

Telefontider:
Måndag-tisdag kl. 08.30-09.30
Torsdag-fredag kl. 08.30-09.30

E-mailka:

arbetsmarknadsochvuxenutbildningskontoret@norrkoping.se

Barta internetka

Warbixin dheerad ah iyo foomka e-lektarooniga ah waxaad ka heleysaa bogga www.norrkoping.se/ ekonomisktbistand

Xafiiska waxbarashada iyo shaqa-u-carbinta dadka waaweyn

Xafiiska waxbarashada iyo shaqa-u-carbinta dadka waaweyn ee degmada Norrköping wuxuu fursado u abuurayaa dadweynaha si ay u gaaraan isku filnaansho oo ay qayb uga noqdaan bulshada, masruufkoodana ula soo baxaan. Waxyaalaha aan qabanno waxaa ka mid ah inaan dadka ku caawinno sidii ay u heli lahaayeen shaqo ama waxbarasho, iyadoo kaalmo dhaqaale oo kumeelgaar ah la siinayo shakhsiyaadka iyo qoysaskaba.

ARBETSMARKNADS- OCH VUXENUTBILDNINGSKONTORET

Adareeska: Norrköpings kommun, Arbetsmarknads- och vuxenutbildningskontoret, 601 81 Norrköping
Adareeska booqashada: Tegelängsgatan 19 A
Teleefoonka: 011-15 00 00

www.norrkoping.se

NORRKÖPING